

## LIFAAAQA II

### Talo Soo Jeedinta Guddiga Farsamo ee Arrimaha Booliska

#### Dibueegid lagu sameeyo tirada Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed:

- i. Waxaa la damacsanyahay in tirada Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed la gaarsiiyo 7,000 oo askari oo tababarkoodu ay bulshada caalamku gacan ka geysan doonto, liiska mushaar bixintooda la dhamaystiri doono dhammaadka sannadka 2010.
- ii. Dhammaadka sannadka 2011 waxaa ka qorsheynayaa in tirada Ciidanka Booliska la gaarsiiyo 10,000 oo askari.

#### Tababarka:

- i. UNPOS ayaa sida ugu dhaqsi badan u billaabeysa tababar Jabuuti lagu siiyo 500 aski oo ka tirsan Ciidanka Booliiska Soomaaliya. Waxaa la qorsheynayaa in la billaabo tababarka 23 Agoosto ee 2010. Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed, UNDP iyo AMISOM ayaa ka wada shaqeynaya diyaarinta tababarka.
- ii. UNDP ayaa tababar siin doonta 500 oo dheeraad ah oo ah ciidan booliis Soomaaliyeed oo hadda la qoro, tababarkaasoo ka dhici doona Akadeemiyada Booliiska Armo bisha Oktoobar 2010.
- iii. AMISOM ayaa tababar siin doonta 200 oo isugu jira saraakiil heerka hoose iyo heerka dhexe, tababarkaasina wuxuu billaaban doonaa bisha Sebtembar 2010.

#### Ku soo dhafidda Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed oo aan hadda ku jirin habka mushaar bixinta

- i. Dowladda KMG waa inay ka soo warbixisaa si rasmi ahna u xaqiijisaa xaaladda 925 askari oo ka tirsan Ciidan Booliiska Soomaaliyeed oo dalka Ethiopia lagu soo tababaray lacagta tababarkuna uu Jarmalku ku deeqay.

AMISOM iyo UNDP waxay dhameystirayaan qiimeynta tababarka la siiyay 925 askari 31da bisha Agoosto, waxayna dibueegid ku sameynayaan haddii tababar dheeraad ah loo baahan yahay si ciidankaas si buuxa loogu dhafo Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed habka mushaar bixintooda lagu soo daro ka ciidan booliiska. Dowladda KMG iyo Midowda Afrika waxay UNDP iyo AMISOM ka kaalmeynayaan sidii loo sameyn lahaa qiimeynta 925 sarkaal.

- ii. AMISOM iyo UNDP waa inay soo dhameystiraan dhammaadka bisha Agoosto qiimeynta tababarka la siiyay 1,300 sarkaal oo ka tirsan Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed oo lagu tababaray Lafaole iyo Labantin Jirow waxayna tala ka soo jeedin doonaan wixii tababar dheeraad ah ee loo baahanyahay si ciidankaas si buuxda loogu dhafo Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed, iyo weliba lagu biiriyo liiska mushaar bixinta. Dowladda KMG waa inay UNDP iyo AMISOM ka kaalmeysaa sameynta daraasada qiimeynta 1,300 sarkaal ee ka tirsan Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed.

#### Qorsheyaasha tababar ee ay dowladaha kale gooni gooni u bixiyaan

- i. Dowladda KMG waa inay xaqiijisaa dhammaan qorsheyaasha tababarka la siiyo Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed ee u dhexeeya heer laba dowladood inay soo maraan habka PTWG. Dowladda KMG waa inay si dhaqsa ah u wargelisaa PTWG, iyadoo u marayso Taliyaha Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed, wax alla wixii ku saabsan qorsheyaal tababar ee hadda dhaca ama mustaqbalka. Qorsheyaasha u dhexeeya heerka labada dowladood eek u saabsan tababarka ciidan booliis cusub waa in la raaciyaa hannaan mushaar bixin oo loo qoondeeyo dhammaan Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed ee diiwaangashan.

#### Mushaarka

- i. UNDP waa inay bisha Oktoobar 2010 dhammeystirtaa bixinta mushaaraadkii Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed ee baaqday ee sannadkii 2009. UNPOS waa inay xaqiijisaa bixinta mushaaraadka dhammaan Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed oo lagu tababaray dalladda bulshada caalamka bisha Janaayo ilaa May 2010 iyadoo loo marayo Mashruuca Booliiska UNPOS oo ay maalgeliso dowladda Japan.

- ii. Waxaa loo baahnaan doonaa lacag gaaraysa 5.4 milyan oo doolar Maraykan ah si mushaar loo siiyo Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed, muddada u dhexeysa June iyo Disembar 2010 bulshada caalamkana waa laga codsanayaa inay bixiso lacag dheeraad ah.
- iii. UNDP iyo Dowladda KMG/Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed waa inay si hoose isula shaqeeyaan si ay ay u dhammeystiraan ugu dambeyntii 31ka bisha Agoosto 2010 hal liis oo koobaya dhammaan saraakiisha Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed lago soo tababaray dalladda bulshada caalamka oo xaq u leh in lagu daro habka mushaar bixinta. Dowladda KMG waa inay soo gudbisaa liis sidaas oo kale ah oo midaysan oo koobaya ciidanka mileteriga waana inay xaqiijiso in liiska aan noqon mid la mid ah ka booliiska. Habka diiwaangelinta iyo mushaar bixinta booliiska waa inuu gaar ka ahaadaa ka ciidanka mileteriga, sababo sharci awgood oo ay soo geediyeen deeqbixiyeyaasha kala duwan iyo UNDP.
- iv. Dowladda KMG waa inay la timaadaa qorshidii ay lacag u qoondeyn lahayd bixinta mushaaraadka ciidaamada Soomaaliyeed ee qalabka sida oo ay boolisku ka mid yahay, iyadoo qayb ka ah miisaaniyadda qaran ee Soomaaliya.